UN-HABITAT

Barnaamijka Degsiimada Aadamaha
ee Qarammada Midoobay



6. Xildhibaanka G/degaanka oo ah Karti-geliye

Taxanaha
Tababarka

Komishanka
Yurub





## Xildhibaanka G/degaanka oo ah

# Karti-geliye

**Tilmaame-bare 6**

Tababarka Hoggaanka la Doortay

**Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha (HABITAT)**

# Xildhibaanka Karti-galiyaha ah

## Tilmaame-baraha 6aad

## Tababarka Hoggaanka la soo doorto

**Xil Dhibaanka Karti-galiyaha ah**

**Taxanaha Agabka Tababarka**

**Istanbuul, 1996kii-"Shir-madaxeedkii Caasimadaha"**

**Xil**
**Dhibaanka**
**Karti-galiyaha**
**ah**

**Tababarka**
**Hoggaanka**
**la soo doorto**

**ii**

**HS/712/04SO**

# HORDHAC

Sidda ay na tussayaan qiimaynta baahida tababarada ay qabatay Xarunta Jimciyadda Qurrumaha- u qaybsan dajinta dadka, iyo baahidda loo qabo tababarka Xil-dhibaan loo doortay Dowladdaha-Hoose, ama Siyaasiyyiinta Degmooyinka. Baahidaasi waxaa loo arkaa in ay ka mid tahay arrimaha muddan in deg-deg ahaan Aduunka oo dhan wax looga qabto.
Waxa kale oo aan lagu dadaalin xoojinta kobcinta Degmooyinka iyo maamulka Dawladaha-Hoose. Dhawrkii sanadood oo ugudambeeyey, dhawr dal oo kal-duwan sidda Nepal iyo Poland amba Uganda iyo Paraguay ayaa bilaabay markii u horeysay hab ay ku doortaan xildhibaanadooda iyo maayaradooda. Baahida loo qabo tabarbarka xildhibaanada loo doortay dawladda-hoose waxay ugu saraysaa liiska tababarada dawladaha ku dhisan habka dimuquraadiyadda sida, Ecudor, India, iyo dalka Maraykanka.
Si loga jawaabo baahiyahaa xarunta (Habitat) waxay soo saartay oo tijaabisay taxane buugag ah oo ku saabsan tababarada sidday uga caawiyaan xil-dhibaanada dagaankaanada ay ka wakiilyihiin in ay ka bartaan waxay tahay hogaaminta wadanimo, sidday ula shaqayn lahaayeen Dawladda-Dexe, iyo maamulka, farsamo-yaqaanada, saraakiisha iyo shaqaalaha Dawladda- Hoose iyo hay'adaha kale ee Degmadiisa.

Buugaagtu waxay ka hadlaysaa nidaamka, tallo-gaadhka, wada-xidhiidhka, wada-doodka, hogaaminta, hagaajinta, qabashada shirarka, kartidda gudiga iyo hawl-fudaydintooda, maamulida dhaqaalaha iyo wixii la xidhiidha.

**Xil Dhibaanka Karti-galiyaha ah**

**Tababarka Hoggaanka La soo doorto**

**iii**

Waxa ku qoran Duruus Buugan ku saabsan, Xildhibaanka Karti-galinta leh, ka mid yahay 12 Buug oo taxane ah, oo loogu talagalay inay isticmaalaan tababarayaasha hayadaha tababarada qaranku si ay ugu tababaraan dawladda hoose ama xubnaha tababrada ee Dawladda-Hoose.
Waxaa kale ay soo saartay (Habitat) Buug kale oo kaabe ah oo la yidhaahdo{Tusaha tababaraha habka loo tababaro saraakiisha la doortay).
iyo war-bixinno kale oo gaar u ah tababarayaasha, waxna ka taraaya sidday u qorshayn lahaayeen tababarka saraakiisha Degmada ee la soo doortay, waxaynu ka filaynaa in buugan laga baranaayo tababarka uu aad wax uga taro xoojinta awoodda Dawladda-Hoose marka lala yimaado wax-qabadyada hogaan fiican.
Taas oo ka mid ah himilooyinka ugu muhiimsan fadhigii Jimciyadda Quruumaha ee 1996 ee ku saabsanaa dajinta dadka (Habitat II).

Waxaan u mahad naqayaa Dr Fred Fisher, iyo Mr David W.Tees oo diyaariyay Buugan iyo Buugaag kale oo taxanaha ka mid ah, iyago wada shaqeen shaqaalaha xarunta jimciyadda Qurruumaha u qaybsan dajinta dadka (Habitat), qaybta tabarka oo lagu qabtay Xarunta tababarada, iyadoo kaalmaysay Dawladda Netherland.
Waxa kale oo aan aqoonsanahay waxtarka tababarayaasha iyo saraakiisha Dawladdaha-Hoose ee dalalka Costa Rica,, El Salvador, Kenya, Lithuania, Romania iyo Uganda, kuwaas oo nagu caawiyay tijaabooyinka qalabadda tababarada.

Dr. Wally N’Dow
Kaaliyaha xog-hayaha guud.
Xarunta Jimciyada Quruumaha
Ee dajinta dadka(Habitat).

**Xil**
**Dhibaanka**
**Karti-galiyaha**
**ah**

**Tababarka**
**Hoggaanka**
**La soo doorto**

# AQOONSI

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaasha Hoggaanka la soo doortay waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay EU-du, isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaashan Tababarka Hoggaanka la soo doortay, waxa ka hawl-galay koox tarjumadda ku xeel dheer oo ka tirsan: Akaademiga Nabadda iyo Horumarka, Jaamicadda Hargeysa iyo Jaamicadda Cammuud; iyaga oo ay ka caawisay Hay'adda QM ee HABITAT, laanteeda Hargeysa ku taal.

Mahad-naq gaar ah waxa mudan Akaademiga Nabadda iyo Horumarka oo ka hawl-gashay tifaf-tirka iyo isu-ekeysiinta Tilmaame-barayaashan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhista iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

Mahad-naq gaar ah waxa isna mudan Maciej Sudra oo diyaariyay astaamaha iyo naqshadaha jaldiyada Tilmaame-barayaashan.

# Helaysid Warbixinta

**Bogga**

Sidaad buugan war bixinta ku taal aad u adeegsanayso 1

**Qaybta 1**

Qoraal ku saabsan Xil-dhibaanka degaanka iyo kartida fulintiisa 7
Qeexid 4
Soo koobid 4
Cabiraad/Ra'yi-dhiibasho 4
Figrado iyo Aragtiyo 5
Stratajiyada Karti-siinta 5
Staraatijiyadaha Karti-Fullinta 7
Cabiraad Ra'yi 8
Shaqo-xidhiidhin 9
Wada-Shaqaynta 10
Wax abuurka 11
Hawl-Fududaynta/ Karti siinta/Awood-siinta 12
Qodabo Muhiim ah 16
Ku-dar - kala-doorista dawlada-hoose ee shaqo bixinta 16
Raad-raac 19

**Qaybta 2**

Dulmar 21
Tusmada 21
6.1 Layli iskulaylineed sagaalka dhibcood 24
6.2 Qadimaada tababarayaasha 26
6.3 Layli: Adeegsiin door ah 27
6.4 Layli: Maapka daneeyayaasha 29
6.5 Layli: Maapka daneeyayaasha 31
6.6 Prograamkii Millyanka Guri 32
6.7 Layli Xirfad Gudbin 37

## Bixinta ku taal aad u adeegsanayso

Buugani wuxuu ku saabsanyahay sida loo tabaraayo Xil-dhibaan karti-fullin leh, sida buugaagta kale ee taxanaha, waxaa loga faa'iidaysan kara siyaabo dhawr ah, oo ay ka mid yihiin: -

### Wax-is-barrid

Qoraalka buugan ugu horeeya waxaa loogu talla galay in uu iskii-wax-kuu barro. Waxaad qudhood u baahantahay meel xasiloon, waqti kugu fillan iyo qalab aad wax ku qorto. Si aad u hesho waxtar wanaagsan, waxaan kugu dhiiri-galinaynaa in aad ka jawaabto su'aalaha laga keeno marwalba qoraalka. Qiimaha barashada macluumaadkani way tarmaysaa hadduu akhristuhu waqti badan ku qaato.

### Tababar Aqoon Iswaydaarsi

Duruusta iyo qalabka dhigista tababaraha ee buuggan ku qoran, waxaa logu talla-galay in ay ku isticmaalaan tababarayaasha khirbradlayda ahi tababarada Xil-dhibaanada dowladda hoose ee  kala duwan.

Waxaan buugan ku kordhinay waxbarashooyin-hawleed oo kala duwan iyo qaabab tussaya tababaraha sidduu u waafajin lahaa tabarbarka baahida gaarka ah ee Xil-dhibaanada

Ujeedada aannu buugani us oo saarnay waxay tahay in aanu ku dhiirigalino tababaruhu uu ku kaabo khibradiisa duruusta uu dhigayo si uu kor ugu qaado waxbarashada gudoomiyayaasha. Tababaraha waxaa u banaan inuu duruusta uu dhigo sida buugan kutaal iyo habka ay u dhigan yihiin. Haseyeeshee, hadduu doorbido in ay haboontay, wuu isku badali karaa ama dib-uhabayn ku samayn kara duruusta siduu u buuxiyo ujeedada tababarka

Mudada tababarku soconayaa waa saddex saacadood maalintii hadiise tababaruhu uu doono in ku siyaadiyo cashara kale oo aqoontiisa ah waxay ku qaadan karta maalindhan buugani wuxuu ka mid yahay 12 buug oo lagu talagala barashada hogaanimada.

Waxaad ku tashan karta, ama lagaa codsan karaa in aad tababar aad bixisid ka doonaya wax dhigid ama buugaagta oo dhan oo ka qaadana muddo dheer. Buug kasta gaar ahaantiis waxbaa laga barran karaa, haddana wax kabarashada buugaagta si taxane ah, waxaad ka faa'iidiyaan Xil-dhibaan aqoon aad u xeel dheer.

## Tababar kooxeed

Buugaagtani waxaa kale oo loo adeegsan karaa, addoo door-biddaaya kaalmada tababare ama hawl-fududeeya khibrad leh, hagaajinta hawl-qabadka xildhibaanada ka wada shaqeeya tallis qudhah. Marka la tababaro xildhibaanada wada shaqeeya, waa in kalkaaliyuhu u habeeyo durrista tababarka ee ku taal book-gacmeedkan siyaabo kala-duwan.

Waxa dhaca xilliyo uu hawl-fududeeyuhu door bido in duruus cusub uu ku kordhiyo, taas oo ku xidhan duruufta ama heerka aqooneed ee kooxda.

Duruufahaas oo kale markay yimaadaan, waxaanu kaa rajaynaynaa in aad u aragtid buugan qalab wax lagu qabsado oo ay ku jiraan fikrado-tababar oo lakala dooran karo, la isku khaldi karo, isu-dhigma, ama laga tagi karo, iyadoo hadba loo adeegsan karo sidda ugu haboon.Tababaro badan oo aad kala dooratid ayaad ka helaysaa buugaagtan, waxaanu kaa rajaynaynaa in aad si fiican uga faa'iidaysatid Mudada tababarku soconayaa.

Qormo

# QAYBTA 1aad

Xil
Dhibaanka
Karti-galiyaha
ah

# Xil Dhibaanka  Karti-galiyaha ah

Tababarka
Hoggaanka
La soo doorto

**Qormo**

**Xil Dhibaanka Karti-galiyaha ah**

**Tababarka Hoggaanka La soo doorto**

**4**

**Qeexid**

Markuu xildhibaanku yahay karti-fuliye, wuxuu suurta-galliyaa arrimaha, qabashadooda, waanu u sahlaa kuwa aan diyaarka u ahayn inay iskood wax u qabsadaan.

**Soo Koobid**

Qoraalkani waxbuu ka tusaya xeeladaha iyo tabaha kartifuliyuhu uu ku caawin karo dadka kale. Tusaale ahaan, waxay ku tusaysaa waxyaalahan sidda shaqo-xidhiidhinta, ka-qayb-qaadashada shaqada oo ah habka dhisida wax-qabadka, wada-shaqayn, kala-door-bidka iyo shaqo-abuurka.

**Cabiraad/Ra’yi-dhiibasho**

Intaad akhriyayso qoraalkan, ka fakir waqti-yar sidaad u xallin-lahayd shaqadan soo socota:

Waraysigani wuxuu ugu horeeyaa dhawr waraysi oo kaa caawinaaya sidaad uga faa’iidaysan lahayd fikradaha ku yaal buugan iyo kuwa kale ee la socda.

Markaan isuqaato kartifuliye, waxyaalahan soo socda ayaa kusoo dhaca maskaxdayda:

1. ______________________________________________

   ______________________________________________

   ______________________________________________

2. ______________________________________________

   ______________________________________________

   ______________________________________________

3. ______________________________________________

   ______________________________________________

   ______________________________________________

Qormo

## Figrado iyo Aragtiyo

Qorshaha caalamiga ah ee gabood soo-saarka sannadka 2000 wuxu inoo sheegaya in ay karti siintu tahay habksa xooga dihin iyo khayraadka oo dhmaan kuwa ku hawlan gabaad soo-saarka iyo habka hagaajinta oo la isu keenay goa'nka u dambeeya, oo ah siday gabood u samaysanayaan waxa iska le dadka ay khusayso.

Erayada muhimka ah ee ku jiraa sharaxaha UNCHS (Habitat) waa isku-ururin iyo go'aan. Karti-fulintu waa samaynta arrimaha isku uruurinaaya illaha dhaqaale ee qaar kale u baahanyihiin adoon ka qaadayn xaqa ay u leeyihiin in ay ka go'aansadaan sidda, marka iyo meesha ay ku adeegsanayaan.

Tusaale ahaan; kuwani waa dhowr wax-qabad ood wax kala bixi karto markaad karti-fulliye tahay sidaad u dhamaystirto himilooyinka lagu sharxay habka caalamiga ah.

**Xil Dhibaanka Karti-galiyaha ah**

**Tababarka Hoggaanka La soo doorto**

**5**

- U fidi waxyaalo dhiirigaliya dadka saboolka ah sidday u dhistaan gaboodkood
- U sheeg halka laga hello war-bixinta waxtaraysa, sidday xil isaga saari lahaayeen gabood dhiska
- U diyaari tababar kuwa doonaya in ay dhistaan gaboodkooda.
- U dhis kalsoonida ku u baahan gabood, sidday xoogooda ugu gaadhaan himilooyinkooka.
- Ka dhaaf wixii is hortaagaya ee xeer iyo dhaqaale ah.
- Ku caawi kuwa doonaya in ay howgood u dhistaan siday u helaan wixii lagama maarmaan ah.
- Xallil khilaafyada cabudhinaaya wax-qabadka shakhsiga ama bulshada.
- Diyaari ururo u hawl-fududeeya kuwa kale horumarinta gabood-dhiska.

## Stratajiyada Karti-siinta

Hadaynu si kale wax u sheegno, waxaa weeye in aan abuurno deegaanka muwaadiniintu ay baahidooda wax kaga qaban karaan awoodooda intii suura-gal ah.

Hoyga loo dhisaayo dadka baahi dhaqaale hayso ma aha shaqada dawaladda hoose ama waayaha kale ee dawladda.

Si kale haddaan u sheegno, waa in la qabtowax allaale wixii --- ee ka caawinaya dadkaasi sidday hooygooda u dhisi lahaayeen.

**Qormo**

Dawladda hoose badan waxay helaan ee lagu kartigalinaayo dadkay xugumaan siday u qaban lahaayeen shaqooyinka iyo xilka ka saaran adeegaadweynaha iyo horumarinta dhismo-hooseedka oo hore loogu arkay in gaar u tahay dadweynaha.
Halkan waxa ku yaal dhawr tusaale oo ku saabsan siday dawladaha hoose wax uga badalaan ugana qayb qaataan danta guud.

## Srilanka – Barnaamijka Malyanka Aqal

{ Markii maqaalkan la qoray, barnaamijgu wuxuu maraayey 1.5 malyan aqal walina way kordhaysaa}
hayada wadaniga ah e horumarinta aqal-dhiska way ka madax banaantay maamulka dawladda. Koox saraakiil ah waxaa loo tababaray in ay ku maamulaan dayn yar iyo kaalmo farsameed, siday u gargaaraan dadka reer miyiga ah in ay dhistaan guryo cusub, kuway ku jiraan ay tayadooda hagaajin lahaayeen.
Awooda dadweynuhu way ka wareegtay gabood dhis, waxay isu badashay habka wada-shaqeynta bulshadsa, taaso u suurto galinaysa reer miyiga dalkan in ay dhistaan oo ay hagaajiyaan guryadooda.

## Tijaabada Mashruuca – Orangi, Karachi, Pakistan.

Mashruucan wuxuu u suurta galiyey dadka dakhliga yar in ay maalgaliyaan oo ay ku arkibaan dhuumaha qashin-saarka degmo ka kooban 20,000 oo dadku iskood u dhisteen. Waxaana isku habeeyey oo fuliyey hay'ad aan dawli ahayn.
Mashruucan oo ay ka dhalatay in boqolkiiba labaatan ay ku baxaan qiimaha dhismo-hooseedka.Wuxuu adeegsaday habab kala duwan siduu hawsha usocodsiiyo.
Xaafadda waxay kala soo baxeen koox ka soo uruurisa qofkasta wuxuu ugu
Ardayda waxay u qaybiyeen kooxo oo ay kukala dareen xirfad-layaal si loo socodsiiyo farsamada shaqo. Waxay soo amaahdeen qalabkii ay ku qaban lahaayeen baaritaan-guud iyo naqshadda shaqada. Waxay ka dooneen deeq ururada samafalka.
Waxay soo ururiyeen shaqaalihii degmada ee ku tabarucay dhismaha dhuumaha-qashin-saarka.

**Xil Dhibaanka Karti-galiyaha ah**

**Tababarka Hoggaanka La soo doorto**

**Qormo**

## Mashruuca Horumarinta Biyaha ee Uganda

Dawladda Uganda waxay diyaarisay qorshe uu dhamaystirkiisu yahay 2000 oo ay ku gaadhsiinayso boqolkiiba 75 reer-miyiga biyo la cabo oo ka yimid illo-biyood la hagaajiyey.

"Himiladan waxay ku salaysantay in bulshada degaanku xil iska saarto intii suurto gal ah horumarinta biyo-gaadhsiinta reer miyiga."

Si himiladdan loo dhamaystiro, dawladda Uganda waxay bilooday hab ay ku maamuusho bulshada.

Habkaasi wuxuu siinayaa tababar, gargar-farsameed, siday dib ugu bixinaayaan kooxaha xaafaddu daynta ay xilkooda qaadeen, sidda isu habayn lahaydeen inay u qorshayaan, u dhistaan, uga shaqaysiisaan, u hagajinlahayeen adeegyada biyaha bulshada ka dhexeeya.

Labada tusaale ee u horeeya waxa laga soo qaatay war-faafinta UNCHS. (Habitat) oo ku saabsan kaalinta, xilalka, iyo awooda loo leeyahay maamulka degmooyinka dadka 1990.

## Staraatijiyadaha Karti-Fullinta

Hadaad tahay Xil-dhibaan, oo aad rabto meel-marinta howsha, awood-fullintaasi waxay rabtaa xeelado aad adeegsato.

**Xil Dhibaanka Karti-galiyaha ah**

Intaynan ka hadlin arrinta, waa in aynu u fiirsanaa aragtida aasaaska ee waaxyaha dawladdu ka haysato meel-marinta shaqada.

E.S. Savas wuxuu yidhi "shaqada dawladdu waa hogaamin, ma aha kaxaynta huudhiga"

**Tababarka Hoggaanka La soo doorto**

Shaqo ugayntu ama bixintu waxay la mid tahay huudhi kaxaynta, kaxayntuna ma aha shaqada dawladda

Maqaal kazoo baxay baanka-aduunka oo ku saabsan madax-banaanida shaqada dadweynaha, Terry Silverman, wuxuu qeexayaa waxaa u dhexeeya diyaarinta hantida dadweynaha iyo wax-soo-saarka hantidaa.



Provision: waa dhaqaale-uqoondaynta shaqo amah anti iyo ilaalinta adeegsigeeda.

Production – waa u badalka hantida siday u dhaliyaan faa'iido ama shaqo.

**Qormo**

Silverman wuxuu yidhi " waa xaqiiq in dawladuhu ka masuul yihiin in ay u qoondeeyaan maal-gashi hantida dad-weynaha

Wallo aanay ahayn lagama-maarmaan in ay dawladdu si toos ah uga midha-dhaliso hantida iyo shaqadaba.

Hadaad waafaqday odhaahdan, taasi waxay inoo sheegaysaa in hadaad tahay xi-dhibaan aad ku jirto shaqo-qabad iyo tallo-goyn, taasoo garab ka siinaysa dawladda hoose xoojinta haggidda hawsha, iyo yaraynta qabashadaa shaqada.

## Cabiraad Ra'yi

Halkeebay dawladda hoose ka taagantahay ka midho-dhalinta hawalaha?

Liis ka samee hawalaha waqtigan jooga aad soo saartay

Kuweebaa hawlahan si karti iyo hufnaan leh ay u qabteen ururo ama hayado?

Maxaad u baahantahay in aad qabatid, hadaad ka wareejisid wax ka soo-saarka hawalahan dawaladda hoose oo aad u wareejisid cid kale.

Halkan waxaa ku yaal dhawr xeeladood ama tabbood oo dadka lagu adeegsi galiyo sidday u meel-marin lahaayeen wax-qabadka.

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

**Xil Dhibaanka Karti-galiyaha ah**

**Tababarka Hoggaanka La soo doorto**

**Qormo**

## Shaqo-xidhiidhin

Shaqo xidhiidhintu waa hab aan qiimayn sharciyadii dhaqanka u ahaa xafiisyada dawladda ee ahaa go’aan gaadhis iyo xallilaad mushkilada.

Habkani wuxuu ku sifoobay isku xidhida ururada iyo shakhsiyaad gaar ah ee shaqo u wada jeeda sidday u baahinlahaayeen khayraadka, mashaakilkana u xallilaan.

Shaqo-xidhiidhintu aqoon balaadhan bay inaga tussaysaaa, had iyo jeerba khayraadka bulshada taasoo loo adeegsan karo xallilaada mashaakilka.

Tusaale ahaan, tadobaadka ugu dambeeyey, waxaad ogaatay in warshadda labbanka ee degmadu ay maalinta sabtida u diyaarisay in gaadhi-xamuulkeedu uu bilaash ugu rarro qalabka dhismaha xaafadaha magaaladda u dakhli yar.

Waxaad kallood ogaatay in urur haween ahi, u baanyahanyihiin gaadhi-xammuullka, aanayse maqlin deeqda sharikadu bixisay.

Marka waxa haboon in aad isu keento labada dhinac.

laba astaamood baa sifeeya shqo-xidhiidhinta oo kala ah:

Ukaalmayn-Rabitaan Iyo Wax-qabad Rabitaan

U kaalmayn-rabitaan: waa shakhsiga oo raba in uu ukaalmeeyo dadka baahan goorkasta iyo duruuf kasta oo jirta.

Rabitaan wax-qabad: waa rabitaanka iyo kartida qofku u leeyahay wax qabadka, iyo habaynta sharciga shaqada iyo xadaynta xuduuda shaqada siduu dadka ugu caawiyo in ay noqdaan dad ficil leh oo awooda iyo dareenkaba wadaaga oo isku-duubni aan cabsi lahayn uwada qabta khayraadka. Waxa xabad guula aduunka taala ma noqon karaan guul dhan hadaanad isku taxin{ Waa maah-maah laga yaqaan dalka kuuriya}.

*Waxa xabad guula aduunka taala ma noqon karaan guul dhan hadaanad isku tixin*

Waa maahmaah kuuriyaan ahaan

Qormo

Xil
Dhibaanka
Karti-galiyaha
ah

Tababarka
Hoggaanka
La
soo doorto

10

## Wada-Shaqaynta

Wada-shaqayntu waa isku-xidhka dadka si ay u dhamaystiraan wada-jiritaan himilo waxtar leh.

Haddii aynu u sheegno si cilmiyaysan, "waa hab si-wada-jir ah ay go'aan uga gaadhaan daneeyayaashu mustaqbalka arrinta ka dhexeysa.

Had iyo jeer wada-shaqayntu waxay isugu tallaabisaa oo ay oo ay xidhiidhisaa wax-qabadka laba qolo sida shaqada dadweyne iyo ta gaarka ah, samaysiga gaboodka iyo falashada beeraha, amba macaash ma-doone iyo macaash-doonaha. Laba qaybood baa loo baahanyahay si loo hubiyo ku-guulaysiga isu-talabinta wada shaqaynta.

1. Dul-saar, ama saamiga lagu hagaajinaayo shaqada {maxaa ugu jira dhinac kasta si loo wada-shaqeeyo?} iyo
2. saamiilayaashu siday u qaateen ama u fahmeen heerka isku-tiirsigood siday u qabtaan arrinta

martaa laba dhinac oo aan dhicin badanaaba isu-imaatingood, oo wajiyo kala duwan ka arka arrinta, baadhista waxay ku kala duwan yihiin iyo la imaatinka xalka shisheeye aragtidooda gaaban ee qof ahaaneed ee suurta gal ah.

Go'aanka wada-shaqaynta waxaa kugu dhaliyaa dhowrkan arrimood oo ah:

- ∉ wax-qabasho
- ∉ Xasilooni
- ∉ Sharci-sugnaan
- ∉ Wada-wadaaga faa'iidada.

Wada shaqayntu had iyo jeer waxay dhex- Waxaa jira dhawr meelood oo wada-shaqayntu aan caqi-gal ahayn sidda

- Markay u dhexayso awood weyni dhinacyada wada-shaqaynaya.
- Marka waxa la qabanayaa uu aad cabsi u leeyahay
- Marka aan la hayn wakiil isu keena dhinacyada
- Marka la go'aansado in qiimeynta awood ku baxaysa hagaajinta wada-shaqaynta ay aad u sarayso

## Wax-abuurka

**Qormo**

"Sawirashada waxaad ka fikiraysid sidday yihiin aad bay uga muhiimsanyihiin cilmiga". Waxaa sidda yidhi Albert Einstein, waxaan u ahaa shaqsi aqoon ballaadhan. Wax-abuurku waa ku-kaca muuqaalka isagaa tussah markaas fikirtid. Taasina waxay muhiim u tahay markuu guddoomiyuhu rabbo in u noqdo karti-fuliye. Waa kartida aad ugu helikartid waxa badal u noqon kara iyo xalkood oo aan dadka kale u muuqan.

Tusaale ahaan markay ugu yeedhaan bulshoodyinka qaarkood hanti-gaar-laha in uu qabto hawsha dad-weynaha taasi waa fakir wax- sabab u tahay in ay diranayeen shaqaalaha hanti-gaar-laha tirro sannada ah oo ay ka gaadheen guul.

Mid ka tiran dariiqooyinka badan ee wax-abuurka dawlada-hoose ku kaceen sanadadii u dambeeyey waa doonista dariiqooyin la isku badali-karo si loo qabto mashruuca iyo hawsha bulshada.

buug dhawaan soo baxay; oo ka hadlaaya cusboonaysiinta dawladda, waxay ku sheegeen qorayaashu 36 arrimood oo wax lagu badasho uu dhiibo shaqo siiyuhu shaqaalaha {eeg boga ku dajisan 15-16}

arrimaha qaarkood dhaqan ahaan baa loo yaqaanay sidda liisan-bixistada, deeqda iyo amaahada.

**Xil Dhibaanka Karti-galiyaha ah**

Qaar kalena waxay inoo tilmaamayen ka soo go'id fikirkii dhaqamaadkii ku saabsanaa siday dawadaha – hoose ugu adeegaan muwaadiniintooda iyagoon abuurin xafiisyo aan waxba ka soo bixin.

**Tababarka Hoggaanka La soo doorto**

Markii soo saaristii dabaqad arrimo ah oo wax lagu badalan karo waxay ku dareen habkaasi sida ogalaanshaha shirikadaha warqadaha lacag-bixinta iyo arrimo kala-duwan oo ku saabsan sheergarnimda hanti-dadweyne-iyo hanti gaar iyo hanti dadweyne.

**11**

Qorayaashu waxay doorteen dhawr arrimood oo horumar leh waxaa ka mid ah ku adeegsiga ururada-iska-wax-uqabso (siday u qabtaan hawlo qaarkood), u sinaanta maal-galinta dhiirigalinta shaqooyin cusub) iyo wax-wada-soosaarka. (sida qandaraas-laqaadashada kiraystayaasha in ay hagaajiyaan guryahooda).

Wallaw hababkaa qaarkood aad loogu adeegsado maraynkan, waa wax laga baxay dalalaka qaarkood.

Waxaan ka fikiraynaa gaar ahaan in ku adeegsiga iska-wax-uqabso habka wax

keenista.

## Hawl-Fududaynta/ Karti siinta/Awood-siinta

**Qormo**

Kartida xildhibaanku dagaanku waxay u dhexaysaa hawl-fududaynta iyo awood-siinta. Inkastoo labada hab macnahooda laga fahmaayo erayadaasi, uma baahnin waqti aan ku qeexno.

Koobid ahaan, hawl-fududayntu waa ku adeegsiga shaqooyinka dadka sida (ku dirqinta, ku dhaqaajinta, hab-kooxeed) sidaad uga caawisid in ay u qabtaan si ka wanaagsan waxay ku go'aansadeen in ay qabtaan.

Awood-Siintu: markaan dhinaca kale ka eegno, waa siinta qof kale awooda lagama-maarmaanka ah. {taa aqoonta-nafta ila ta qabta ah} iyo hantida siddu u qabto wixii loo baahanyay qabashadooda.

Hab-kartiyeedkani dhawr wax baad ka dooran kartaa, oo ku salaysan waxaa laga doonaayo in ay karti galiyaan dhinaca kale (kooxda-kale) siday uga soo baxaan kaalintooda iyo xilkooda taasoo si caadi-ahaan ay u qaban hay'adaha dawladdu sida dawaldda-hoose.

Tusaale ahaan, cid kale, sidda dabaqadda hanti-gaar ah, ururada aan dawliga ahayn, ururada-iskaa-wax-uqabso, shakhsiyaadka muwaadinka ah ayaa qaban-kara wixii qabashadooda looga baahdo.Laakiin kooxahaasi waxay

a) Baahan yihiin ansaxinta gudiga sidday u bilaabaan amba,
b) Waxay u baahan yihiin ogalaanshaha gudiga, amba
c) Uga baahan yihiin illa-dhaqaale gudiga ama meela kale.

Illahaa-dhaqaale waxa ka mid ah:

**Qormo**

- Xog
- Kaalmo-farsamo
- Tababar
- Miisanayida shaqo-bilow
- Habaynta ururada
- Ka saarida shaqo xumada xafiisyada
- Helitaanka qalab wax qabadka
- Diirrin wax-qabad

Ama d) sida cid kale oo ku caawisa gudiga inay si ka fiican u qabtaan kolkay kaligood wax qabanayaan

Habka karti-fulinta wuxuu gaar ahaan ugu haboonyahay ururada aan dawliga aheen, ururada bulshada iyo dabaqada hanti-gaarka ah.

Had iyo jeer, waxay ku samayn kara mashaariicda iyo hawlaha qiimo hoose, waxanay soo gaabinayaan mudadii dheerayd ee wax-qabadka dawlada-hoose, taasi waxay ku madhxinaysaa hantida si aad u qabsato hawlo kale. Ku adeegsiga hababkani wuxuu kaa doonayaa adiga iyo saaxibadaa in aad fikirkiina dib ugu noqotaan ku saabsanaa kaalinta dawlada-hoose.

**Xil Dhibaanka Karti-galiyaha ah**

Duqa magaalada St.Paul, ee gobolka Minesota Mr. George Latimen, wuxuu yidhi mar ujeediyey khudbad magaalada ka hadlaysa: "Dawlada magaaladu waa in ay ku samaysaa dib-u-hagaajin iyo dib-u-hufid kaalinta u dhaqanka ah. Waxaan ramaysanay in dawlada magaaladu had iyo jeer cadayso kaalinteedu in ay tahay hawl-fududeeye.

**Tababarka Hoggaanka La soo doorto**

Maamulka magaaladu waa in ay cadeeyaan mashaakilka, deetana usoo ururiyaan illaha-dhaqaale si wax loogaga qabto mashaakiladaa ------ xataa, maamulka dawladdu waa inuu isku-daraa hantida dad-weynaha-iyo ta gaar-ahaaneed siddaynu u qabano himilada bulshadeena.

Qormo

Xil
Dhibaanka
Karti-galiyaha
ah

Tababarka
Hoggaanka
La
soo doorto



**Karti-fullinta iyo Horumarinta Beesha**

John Meknight wuxuu ku qaatay muddo tobnaan sanadood ah Chicago isago ku shaqaynayey habeeye-beeleed. Khibradii uu ka faa'iiday aasaaska wax-uqabadka beesha, waxay u xaqiijisay in ay dawladaha-hoose, markasta "iska toogtaan cagta". Sababtoo ah markay hawsha beesha gacanta u galiyaan meherad-yaqaano iyo xafiisyo aan waxba socodsiin.
Wuxuu rumaysanayahay in marka howsha beesha ay qabtaan xirfadlaydu, taasi ay tamaradarinayso beesha oo ay wiiqeyso muwaadinka. "waxaa jirta fikrad oo laga haysto bulshada in aanay lahayn dad hawl-qabada", laakiin Meknight wuxuu leeyahay. "aasaaska mushkiladeenu waxay timid tamardarida bulshada", Meknight wuxuu isu keenay liis isu-qiyaasid ah oo qeexaya waxtarka uu leeyahay ku adeegsiga "ururada beesha, {sida qoyska, xaafada, masaajidka ama keenista iyo ururrurada iska-wax-u-qabso} halkii laga adeegsan lahaa shaqada xirfadlayaasha iyo hababka shaqa-bixinta.

***Tusaale ahaan:***

- Beeluhu waxay wax-qabad u leeyihiin xubnahooda, sidda shaqo bixiyayaasha ballan wax-qabad u leeyihiin macaamiishooda.
- Beeluhu way garanogyihiin dhibaatooyinkooda adeega xirfadlayaasha.
- Xirfadlayaasha iyo xafiisyada shaqooyinka ay bixiyaan, halka beeshu ay xallisho mashaakilka.
- Hayada iyo xirfadlayaashu waxay soo hormariyaan shaqada, halka beeshu soo hormariso daryeelka wax loo baahanyahay.
- Beeshu shaqo-abbuurka iyo suurta-galintiisa way ka badsataa xafiisyada shaqada-weyn qabta.
- Shaqada beeluhu way ka jabatahay shaqada xirfadlayaasha.
- Beeluhu way ka fullin ogyihiin xeerarka shaqada xafiisyada dawladda ama xirfadlayaasha.
- Beeluhu waxay ahmiyadda saaraan awooda, halkay hay'aduhuna ahmiyadda saaraan waxaa dhiman.

Liiskani wuxuu ku garwaaqsiinayaa awooda ay u leedahay beeshu wax-qabadka mashaariicda iyo hawlaha.

**Qormo**

Sida inoo muuqata haddii aan rabno horumarka magaalooyinkeena iyo dalalkeena waa in aanu leexinaa hawl-qabadka xagga xirfadlayaasha iyo dawlada, howshaaso beeluhu dhaqan ahaan u qaban jireen naftooda iyo muwaadiniintooda.

Mcknight wuxuu inna xusuusinayaa in horumarinta noocani ahi, ay noqon karto lidka wax-soo-saarka oo aadna u qaali ah. Xil-dhibaan kartida leh waa ka

a) Garanaaya waxtarka ay leedahay wax-qabadka beesa iyo xallinta mashaakilka.
b) Garta in uu siiyo "ururada beesha" taageerida iyo awooda lagama maarmaanka ah ah siday u yeeshaan xoog iyo waxtar.

Xildhibaano(dagaan) badan way ku adkaataa in ay noqdaan kariilayaal. Aragtiyaha iyo wax-qabadyada horumarineed ee casrigan wuxuu ku sheegay dawladaha-hoose in ay qabtaan laba door oo kala ah keenayaasha iyo soo-saarayaasha mashaariicda iyo shaqooyinka beelaha iyo waaxyahooda.

(Nasiib wanaag) ururo hore-umaray waxay garanayaan khaldanaanta arrintaasi, laakiin way adagtay in laga fur-furo xafiisyadi dawlada ee isugu xidhnaa. Mar haday ku jiraan). In badan oo beesheena ka mid ah waxay filaysaa in wax-qabadkan (in loo qabto muwaadinka howsha)halkii laga cwaainlahaa (iyago wax-isu-qabta( in uu siisocon.

Guddiga oo u baahan in ay maamulaan dhammaan shaqooyinka iyo mashaariicda degmada, iyo shaqooyinka oo isku-xidhan, awgeed waxaa suurta-gal ah in ay gudiga ay is-hortaagto karti-siintu qaybo shaqada ka mid ah.

Karti-siintu had iyo jeer wxay u baahantahay fikrad cusub oo ku saabsan cidda wax qabanaysa iyo meesha go'aanka lagu gaadhaayo.

Karti-fullintu waxay ballaadhinaysaa shabakada xilka iyo illo-dhaqaale ee beesha marka lagu daro mashaakilka iyo xalkooda. Haddii dawalda-hoose ay ku leedahay ururo awood leh beesha, dadaalkaaga karsiineed,sido kale, waa muhim si ay y meel marto.

> *Gacan qudhihi ma qaban karto wax kasta, ama qof kali ahi wax kasta ma garankaro.*
> Maahmaaha masaydu leedahay.

**Qormo**

## Qodabo Muhiim ah

- Karti-fullintu waa hab ballaadhaniya awooda dawlada-hoose si ay muwaadiniinteeda ugu qabato shaqooyin iyo mashaariic tayo leh.
- Karti-fullintu waa hab isku hagaa-jinaaya illaha-dhaqaale ee beesha una leexinaya go'aan gaadhistana kuwa ku adeegsanaaya in ay ku daboolaan baahidooda.
- Markay dawladda-hoose ay bixiso shaqooyinka loo qabanaayo dadweynaha degmada, waa in ay wareejisaa wax-ka-soo-saarka ururada beesha.
- Xil-dhibaan wax-qabadka leh waxay leeyihiin xidhiidho badan iyo illo-dhaqaale oo ay ka helaan baahidooda.
- Guddoomiyaasha wada-shaqaynta la leh saamiilayaasha siday u keenaan mashaariic iyo shaqooyin, waa in ay ballaadhiyaan kala-doorgood oo ay dhawraan hantidooda.

## Ku-dar – kala-doorista dawlada-hoose ee shaqo bixinta

Waxaa laga sheegay buuggii dhawaan soo baxay ee ku saabsanaa dib-u-ikhtiraacida dawlada in ay ku qoranyihiin isbadallo badan oo ka socda dalka Maraykanka, gudaha dabaqadda dad-weynaha, gaar-ahaan dawladaha-hoose.

Tusaale ahaan, kala-duwanaanta marka la isu-qiyaaso wax-qabadka xirfadlayaasha iyo habka bixinta shaqada beesha iyo wax-qabadkeed ee u yidhi John Knight oo waxaa laga soo qaatay buugan.

Hoos waxaan kusoo koobnay 25 qodob oo ka mid ah 36 qodob ee kala dorashada shaqo bixinta oo ay ku sheegeen qorayaasha buuga(dib-u-ikhtiraacida dawlada).

**Qormo**

1. Dajinta sharciyada iyo ogolaanshaha: qaadashada talaabo dawladeed oo toos ah si loo dhiiri-galiyo shaqooyinka qaarkood, si sharci ahaan amba la joojiyo sharci ahaan.

2. Habaynta xeerka iyo dib-u-habaynta xeerka: badalaadaha muhiimka ee lagu sameeyo shaqo-keenida waxay ku iman kara badan fudud oo lagu sameeyo xeerka dawlada.

3. Ilaalinta iyo baadhista: dawladu waxay ku hagaajin kartaa hantida dad-weynaha amaba hawlaha loo qabanaayo iyadoo ilaalisa keenistooda ama baadha akhkatooyinka.

4. Liisan bixinta ama rukhsada: dawladu way balaadhin kartaa amba way koobi kartaa tirade dadka qabanaya hawl iyadoo badalaysa xeerka liisan doonashada oo waafaqsiinaysa ( yaa shaqada qaban kara iyo yaan qaban karin)

5. Qorshaha cashuurta:dawladu way dhiiri-galin kartaa keenayaasha gaarka ah iyadoo siinaysa cashuur-dhimid ama dayn waanaye is hortaagi kartaa iyadoo cashuur saaraysa badeecadaha iyo howlaha aan la rabbin.

6. Deeqo: Dawladu toos bay ugu caaein kartaa lacag ay ugu tala gashay kooxou baahan gar gaar.

7. Kabitaan dhaqaale: Dawladuhu way in damaanad qaadaan bixinta qiimaha shaqooyinka ay u qaataan in ay faa'iido u leeyihiin dad-waynaha.

8. Daynta:- Dawladuhu way siin karaan maal galin shaqooyinka shaqsiyaado gaar ah amba kooxaha u qalma, taas oo ah dayn lagu xidhay heshiis ah in daynta lagu bixinta muddo cayiman iyo qadar dul-saar ah.

9. Qandaraas-bixin:- Dawladu way igu yeedhi kartaa shakhsiyaadka gaarka ah iyo sharkidaha qandraas in ay ku qaataan wax ka qabadka hawlaha dad-waynaha.

10. Ogolaansho sharikadi bixiso: shaqsiyaada gaarka ah, iyo sharikadaha ku bixiyay shaqo magacooda, waa in adeegsada shaqadu dib u siiyaa qiimaha halkii ogalaatay.

11. Iskaashiga hayadaha dad-waynaha iyo hayada gaarka ah,sharikaat wada-jira ah ayay dawladu la galaysaa sharikadaha gaarka ah, siday u qabtaan oo u maalgilyaan hawlaha dad-waynaha.

12. Sharikadaha dad-waynaha: sgaqada waxaa leh oo wada dawlada, marka dabaqada gaarka ahi kariwaydo in ay qabato hawl dad-waynuhu u baahan yahay.

13. Kasbasho shaqo: dawladu waxay kartaa in ay dhiiri galiso shaqooyinka

qaarkood, taasina waa iyadoo ka iibsata sharikado ka shaqeeya hawlahaa.
**Caymiska: dawladu waa in ay damaanad qaada caymika kooxahan gaarka ah (sida shaqo-laawayaasha, dadka da'da ah amba caydha ah) amba caymiska ku-kaydyadaasha banka si ay uga hortagaan dhicitaan dhibaato-maaliyadeed.**

**Qormo**

15. Badalaada siyaasada maal-gashiga dad-weynaha: dawladu way karta in ay dhiir-galiso amba is hortaagto dadka kale iyago bdalaaya sidda iyo kay u dooranayaan in lagu maal-galiyo hantida dawlada.

16. Kaalmo farsameed: dawladdu way siin karta kaalmo farsameed shaqooyinka jira, ururada beesha, iyo dawladda kale sidday u qabtaan hawl qiima leh

17. Qarfaafin: dawladdu waa in ay uga warantaa arrimaha caafimaadka iyo wixii war-war kale jira dadweynaha taasoo saamayn weyna ku leh.

18. Wareejin: dawladdu way qaban kartaa hawlaha u hogaaminaaya dadka ururo kale oo qaban kara shaqooyinka ay u baahanyihiin.

19. Skood-wax-uqabsadayaal: dawladdu way ku adeegan kartaa iskood-wax-uqabsadayaal, sidday u qabtaan hawlo badan iyado maamulayaan shaqaale mushar ah.

20. Warqadda-lacag-cadaynta: dawladdu way u ogalaan kartaa kooxo gaar ah awooda iibsadka badeecadaha amba shaqooyinka iyago adeegsanaya warqadda-lacag-cadaynta.

21. Saameynta ujuurada: qiimaha ay bulsho ahaan u leedahay wax-qabadku waxuu u dhaafi kara kuwa ka faa'iidaysanay wax-qabadka.

22. Dhiiri-galinta dadaalka aan dawliga ahayn: dawladdu way taakulayn iyo dhiiri-galin karta samaysadka dadaalka caam-ahaaneed ee beesha si loo qabto shaqo dad-weyne.

23. Wax-soo-saarka amba kali-wax-qabsiga: dawladdu way taakulayn karta shaqsiyaadka ama kooxaha sidday uga shaqaysiin lahaayeen ay u maamuli lahaayeen shaqooyinkooda.

24. Maamulka waxa aad loo doonaayo ama dalabka dawladdu way ka qaadi karta tallaabooyin ay ku yaraynayso doonista shaqooyinka qaarkood sidda gownta cashuuraha maritaanka wadooyinka amba ujuurada talafoonada aan daruuriga aheen.

25. Iibista, is-dhaafsiga amba ku-adeegsiga: dawladdu way dhiiri-galin karta dhisida qalabka amba meelaha dad-weynaha iyadoo iibinaysa, dhaafsanaysa amba kula shurkaysa ku-adeegsiga dhulka ama dhismayaal dawladda kale ama sharikadaha gaarka ah.

**Qormo**

## Raad-raac


1) *Xarunta Jimciyada Quruumaha ee Dejinta Dadka(Habitat), istraatajiyada caalamiga ah ee gaboodka ilaa sanadka 2000 [Nairobim UNCHS( Habitat), 1988]*
2) Xarunta Jimciyada Quruumaha ee Dejinta Dadka( Habitat), Doorarka, Xilalka, iyo awooda lagu maamulayo dejinta dadka.
3) Osborne, David and Gaebler Ted, Dib-u-ikhtiraacida Dawladda: Sidda nigaadda ganacsi-aasaaska ay u beddeleysodabaqada dad-weynaha,( akhri, MA, Addison-Wesley, 1992) pp. 25
4) Silverman, Jerry M, Baahinta Maamulka dabaqadda Dadweynahaa-(Washington, D.C., The World Bank, 1990), p. 11
5) Osborne, op, cit, pp. 332-421.
6) Ibid, p. 27
7) Ibid. pp 65-70

**Aqoon-is-weydaarsi**

# QAYBTA 2

**Xil Dhibaanka Karti-galiyahaah**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon-is-weydaarsi**

## Dulmar

### Ujeedo:

Mashaakilada isku-murugsan e soo waajahay bulshooyinka magaalada ayaa sii kordhaysa ugaga dhigtay adayga hogaamiyaasha la doortay in hawsha lagu qabto hab-dhaqameed. Waytageen ayaamihii ay dhaw odayaal ay horgaynayeen xalka haboon dad-weynaha sidday uga helaan ogalaansho.

Waabaa baryay marka laga hadlo arrimaha beesha, guusha lagu gaadhi iskaa-shi waxaa leh, ka-qayb-qaadashada dad badan, iyo kaalinta gudoomiyaha oo ah dhiirigalin, u-dhexeyne, iyo karti-fullin.

> Haddii aad la kulantid qof gaajaysan oo aad siisid xabad kalluun,
> Gaajo qaban mayso, laakin hadaad barto sida loo kalluumaysto,
> Waligii gaajo qabanmayso.
>
> Casharadii yuhuuda ee berigii hore

Tababarkan waxa loogu tala galay inuu gaadhsiiyo ka-qayb-galayaasha in ay gartaan karti-siiyuhu in uu yahay ka doona in uu kaalmeeyo kuwa ay wax-yeeshay mashaakilka beeshu sidday isu caawin lahaayeen iyagoo ka qaadanaaya qayb fir-fircoon sidda xalka lagu helo.

### Tusmada

Hoos waxaa lagu muujiyey sharax gaaban oo laga bixiyey shaqadi kasta ee la baranaayo oo uu la socdo waqtiga loo baahanyahay qiyaas ahaHaddaad jeceshay in aad habka badasho, si aad uga saarto wax, ama ku darto tababar-qalb oo xagaaga ah, way ku furantahay taasi.

**Aqoon-is-weydaarsi**

## 6.1. Fikir Diirin ama Fikir Ka-shaqaysiin: Sagaalka dhibcood

